

## Diyaar Noqo!

**Kafiiri ama kala socomacluumaad** dheeri ah oo kusaabsan ProviderOne-ka Kelida ah qaansheegaaga Nidaamka Lacag bixinta Adeega Bulshada lasoo raaciyo bil kasta.

**Kusoo celi** foomamka aad heshid baakada soo dhoweynta dayrta 2015.

**Dhammeystir tababarka** si aad u baratid sida loo isticmaalo ProviderOne-ka Kelida ah:

1. Sitoos ah:
2. Looqorey
3. Si shakhsi ah (meelaha intooda baddan)

## Su'aalo?

**limayl:** [IPcommunications@hca.wa.gov](mailto:IPcommunications@hca.wa.gov)

**Bogga internetka:** [www.IPOne.org](http://www.IPOne.org)

## Waqti Dhow

Waxaad wici kartaa qof jooga xarunta wicitaanka ProviderOne-ka Kelida ah. Xarunta wicitaanka waxaa la heli doonaa 60 maalmood kahor inta aadan bilaabin isticmaalka nidaamka.



Gobolka Washington waxay qandaraas lagashay Kooxda Latashiga Dadweynaha, Iskaashiga Dadweynaha LLC (PPL) si loo bixiyo adeegaha soo socda iyo taageerada loona shaqeysiiyo nidaamka ProviderOne-ka Kelida ah:

- Degmada, shaqaalaha jooga xarunta wicitaanka ee kuhadla luuqado baddan kuwaas oo awoodi doona in ay kugu caawiyaan su'aalahaaga lacag bixinta.
- Xarunta Hawl fulinta middaas oo socod siin doonta waraaqahaada-xaadirinta, oona diri doonta jeegaga lacag bixinta, boostana u diri doona W2s.

Waxaa aad kubaratey gudaha 2015 ayaa kadhigi kara bedelaada mid fudud 2016.



## Qaabka Lacagta Lagu Siin jirey Wuu Isbedelayaa:

## Kubarida ProviderOne-ka Kelida ah



*Transforming lives*

**Individual  
Provider**



### Waqti dhow...

- **ProviderOne-ka Kelida ah** waxaa lagu bedeli doonaa Nidaamka Lacag Bixinta Adeega Bulshada (SSPS) aad adigu hadda isticmaashid
- Waxaad bilaabi doontaa in aad isticmaashid **ProviderOne-ka Kelida ah** biloowga 2016

Waxaad awoodi doontaa in aad...

- Usoo gudbisid waraaqaha-xaadirinta sitoos ah adiga oo isticmaalaya
  - Kombuyuutar
  - Tablet-ka
  - Teleefoonka casriyeysan
- Kusoo gudbisid waraaqaha-xaadirinta qaab faakis ah
- Kusoo gudbisid waraaqaha-xaadirinta qaab boosto ah\*
- Kuqaadatid lacag bixinada qaab tooska dabaaji dhigasho, kaarka deynta ama warqad jeeg ah

### Adigu ma ahaanaysid mid hadda kadib:

- Hela waraaq qaansheeg bile ah
- Waca saacadahaaga

**\* Boosto kudirada warqada-xaadirinta waxay dib u dhigi kartaa lacag bixinta. Haddii aadan kusoo gudbin karin waraaqaha-xaadirinta tooska internetka, hadda raadi meesha kuugu dhow ee uu kuyaalo mashiinka faakiska lagu diro!**

Macluumadaan waxaa loogu talagalay daryeel bixiyayaasha matalaya SEIU Daryeelka caafimaadka 775NW.

### Siddee ProviderOne-ka Kelida ah u bedeli doonaa qaabka lacagta lagu siiyo?

Adiga hadda waxaad qaadataa mushaar bileed buuxa oo hal lacag bixin ah. Biloowga 2016, waxaad qaadan doontaa bishii labbo lacag bixin—**bar ah mushaarka bisha oo hal lacag bixin ah iyo bar kale oo ah lacag bixinta labbaad.**

Halkan waxaa kuqoran tusaale:

#### Adiga hadda waxaad lacag qaadataa *halmar bishii*

Tallaabada	Goormee?
Waxaad qaadanaysaa waraaqadaada qaansheega loogu talagalay Janaayo.	Janaayo 24
Waxaad soo sheegtaa saacadaha loogu talagalay Janaayo.	Janaayo 31
Nidaamka Lacag bixinta Adeega Bulshada wuxuu boosto kudirayaa lacag bixinta ama wuxuu kudirayaa dabaaji toos ah.	Febraayo 1 (ama maalinta shaqada xigta)

#### Waxaa lacag lagu siin doonaa *labbo mar bishii*\* ay lasocoto ProviderOne-ka Kelida ah

Tallaabada	Goormee?
Waxaad soo sheegtaa saacadaha loogu talagalay Janaayo 1-15.	Janaayo 16
ProviderOne-ka Kelida ah ayaa boosto kudiraya lacag bixinta ama sitoos ah u diraya dabaajida ama kaarka deynta <i>loogu talagalay saacadaha 1-15 Janaayo.</i>	Febraayo 1
Waxaad soo sheegtaa saacadaha loogu talagalay Janaayo 16-31.	Febraayo 1
ProviderOne-ka Kelida ah ayaa boosto kudiraya lacag bixinta ama sitoos ah u diraya dabaajida ama kaarka deynta <i>loogu talagalay saacadaha 16-31 Janaayo.</i>	Febraayo 16 (ama maalinta shaqada xigta)

\*Haddii la helo waraaqadaada-xaadirinta kadib waqtiga kama dambaysta lacag bixintaada jeega waxaa dhici karta in dib loo dhigo wax kabaddan labbo todobaad.